Hablobaasta (Chickenpox)

Waa maxay hablobaas?

Hablobaas waa cudur la isqaadsiiyo oo uu keeno fayraska varicella zoster.

Waa maxay astaamaha hablobaastu?

Astaamuhu sida badan waxay soo ifbaxaan 10 ilaa 21 maalmood kadib marka fayraska lala kulmo. Astaamaha hore waxa ka mid ah xummad fudud oo si lama filaan ah u bilaabanta, daal, iyo daciifnimo. Finan cuncun badan oo dheecaan leh ayaa si dhakhso ah uga soo muuqda madaxa, kadib caloosha, laabta ama dhabarka, iyo marka u dambaysa gacmaha iyo lugaha. Finanka dheecaanka leh waxay muuqdaan iyaga oo kooxo yaryar ah dhawr maalmood. Finanka dheecaanka leh waa qallali doonaan, qolof yeelan doonaan oo noqon doonaan nabarro. Finanka dheecaanka leh waxay ku badan yihiin laabta iyo dhabarka marka loo eego wejiga, gamcaha ama lugaha.

Sidee ayay hablobaastu u faaftaa?

Hablobaastu waxay ugu gudubtaa qof ilaa qof taabashada tooska ah ee finanka dheecaanka leh ama hawada marka qofka xanuusan uu qufaco ama hindhiso. Dadka qaba hablobaastu waxay faafin karaan laga bilaabo 2 maalmood kahor marka astaamuhu bilaabmaan ilaa finan dheecaanka leh oo dhan ay qolof yeeshaan ama noqdaan nabarro (sida badan kadib ilaa 5 maalmood). Hase yeeshee, dadka difaaca jidhkoodu liito muddo ka badan ayey gudbin karaan. Sida ay dhigayaan qaynuunada Massachusetts, dadka qaba hablobaastu waa inayna dugsiga iyo shaqada iman ilaa finankooda dheecaanka leh ay qallalaan oo qolof yeeshaan.

Hablobaastu ma khatarbaa?

Cawaaqibyada halista ah ee ay keento waa dhif iyo naadir, laakiin hablobaastu waxay horseedi kartaa infakshan maqaarka ah oo halis ah, nabarro, oofwareen, iyo dhaawac maskaxda ah. Cawaaqibyada halista ah waxay sida badan ku badan yihiin dhawaan dhaladyada, haweenka uurka leh, dadka difaacoodu liito, iyo dadka muddakarka ah. Qof ay ku dhacday hablobaas, fayrasku waxa uu firfircoonaan karaa sannaddo kadib isaga oo keenaya finan yaryar oo xanuun badan oo la dhaho shingalis (fiiri bogga 3).

Ayaa qaada hablobaasta?

- Qof kasta oo aan hablobaas ku dhicin ama aan qaadan tallaalka hablobaasta wuu qaadi karaa xanuunka. Waxay ku badan tahay carruurta ka yar 15 jir.

- Carruurta ka yar 12 bilood aad ayey u yar yihiin in la tallaalo waxayna ku jiraan halis.

Sideed uga hortagi kartaa hablobaasta?

- Kahortagga ugu fiican ee hablobaastu waa in la is tallaalo.

    - Kaga hortag inay carruurtaadu qaado adiga oo tallaalaya marka ay 12-15 bilood jiraan. Mar qaadasho labaad oo tallaal ah waa in la siiyo 4-6 jirkooda. Haddii ilmahaagu seegay tallaal, waydii dhakhtarkaaga sida uu u heli lahaa.

SII WAD (bogga 1 ee 3)

- Cid kasta oo 7 jir ama ka wayn oo aan hablobaas ku dhicin ama aan la tallaalin waa inuu helo 2 mar qaadasho; dadka 7 jira ilaaa 12 jir ah waa inay helaan 2 mar qaadasho, 3 bilood u dhaxayso, dadka 13 jir ama ka wayn waa inay helaan 2 marqaadasho, 4 toddobaadna waa in ay u dhaxayso
- Qofka aanay hablobaas ku dhicin oo helayna hal marqaadasho oo kaliya waa in la siiyo mar qaadasho kale.

- Tallaalku wuxuu si gaar ah ugu muhiim yahay haweenka qorshaynaya inay carruur dhalaan (ugu yaraan 1 bil kahor qaadista uurka ama kadib dhalmadda), shaqaalaha daryeelka caafimaadka, iyo kuwa la nool qof difaaciisu liito.

- Tallaalaanta kahor intaanad la kulmin hablobaas ayaa ah kahortagga ugu fiican; hase yeeshee, tallaalka lagu siiyo saddex ilaa shan maalod kadib la kulanka sidoo kale waxaad ka heli kartaa waxoogaa kahortag ah.

- Dadka qaar aan la tallaalin oo hablobaasna ku dhicin (sida dhawaan dhaladyada, haweenka uurka leh, iyo adka difaacoogu liito) waa inay si dhakhso ah ula kulmaan daryeel bixiyahooga caafimaadka haddii ay la kulmaan qof qaba hablobaas sababtoo ah waxa la siin karaa daawayn (kiniin ama duris) taasi oo siin karta kahor muddo gaaban haddii la siiyo inyar kadib la kulanka.

Qaynuunada Massachusetts waxay ka rabaan caddayn tallaalka hablobaasta dhigashada dugsiyada, oo kolajku kujiro. Kooxaha kale, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadku, waa idhigashada dugsiyada, oo kolajku kujiro. Kooxaha kale, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadku, waa inay ka tallaalaadaan hablobaasta.

Caddaynta tallaalka waxa kamid ah:

- Caddayn qoraal ah ee tallaalka hablobaasta ee saxda ah iyada oo la raacayo shuruudaha tallaalka dugsiga ee Massachusetts.

    - Massachusetts waxay wakhtigan fulinaysaa shuruudaha tallaalka habolbaasta. Carruurta barbaarinta intooda badan ilaa kolajka waxa laga rabaa inay qaataan 2 marqaadasho tallaalka hablobaasta ama caddayn kale oo tallaal. Ardayda qaar, ay kujiraan daryeelka ilmaha iyo ardayda dugsi horraadku waxa kaliya laga rabaa 1 marqaadasho kaliya ama caddayn tallaal oo kale. Shuruudaha tallaalka dugsiga Massachusetts, booqo www.Mass.gov kana raadi "immunization requirements".

- Ku dhashay Maraykanka kahor 1980 (*tan caddayn tallaal uma noqonayso bixiyayaasha caafimaadka ama haweenka uurka leh)*

- Caddayn qoran ee baadhista dhiig oo xaqiijinaysa tallaalka

- Caddayn qoran ee hablobaasta inuu kaa helay bixiye caafimaad

- Caddayn qoran ee taariikhda shingalis ee bixiyaha daryeelka caafimaad

Ma tahay haweenka uurka leh inay ka walaacaan hablobaasta?

Haweenka uurka leh ee hore u lahaa xanuunka hablobaasta ama tallaalka hablobaasta waa tallaalan yihiin. Haweenka hablobaas ku dhacdo iyaga oo uur leh waxay aad ugu dhaw yihiin inay yeeshaan cawaaqibyo halis ah marka loo eego dadka kale. Xaaladaha qaar, hablobaasta waxa loo gubin karaa ilmaha yar. Haweenka uurka leh aan hablobaas ku dhicin lana kulma qof qaba hablobaas waa inay si dhakhso ah ula kulmaan dhakhtarkooda.

SII WAD (bogga 2 ee 3)

Ma qaadi kartaa hablobaasta halmar kabadan?

Haa, laakiin waa dhif dhif. Xanuunka hablobaastu wuxuu sida caadiga keenaa difaac nolosha oo dhan ah, dadka badankooduna markale ma qaadaan. Hase yeeshee, fayraska keenay hablobaastu wali wuxuu ku sugan yahay jidhkaaga waligaaba. Sannaddo kadib wuxuu kugu keeni karaa finan yaryar oo xanuun badan oo la dhaho shingalis (fiiri bogga 3).

Tallaalka hablobaastu ammaan ma yahay?

Haa, waa u ammaan dadka intooda badan. Hase yeeshee, tallaal, sida daawo kasta, wuxuu awoodaa keenista mushaakil sida xummad, finan, xanuun muddo kooban ee goobta durista iyo falcelino xasaasiyadeed. Mashaakillo kasii daran waa dhif iyo naadir. Qiyaastii 70-90% dadka tallaalka qaata hablobaastu kuma dhacdo. Haddii qof tallaalan ay hablobaas ku dhacdo, wax badan ma yeesho.

Ayey tahay inayna qaadan tallaalka hablobaasta?

- Dadka xasaasiyad halis ah ka qaata gelatin iyo daawada neomycin waa inayna qaadan tallaalka hablobaasta.
- Dadka ka qaaday falcelin halis ah tallaal hore oo hablobaas waa inayna qaadan tallaalka hablobaasta markale.
- Haweenka uurka leh waa inayna qaadan tallaalka hablobaasta ilaa ay dhalaan.
- Dadka qaba kansar, HIV, ama mashaakilada kale ee daciifiya difaaca jidhka waa inay la tashadaan dhakhtarkooda ama kalkaalisada caafimaad kahor intaan la tallaalin.
- Dadka dhawaan lagu shubay dhiig ama la siiyey waxsoosaar kale oo dhiig waa inay waydiiyaan dhakhtarkooda marka ay heli karaan tallaalkooda hablobaasta ilaa waxsoosaarkan uu si kumeel gaadh ah u nusqaamin karayo waxtarka tallaalka.
- Dadka leh xanuun dhexe ama daran waa inaan la tallaalin ilaa xummadda iyo astaamaha kale ay tagaan.

Waa maxay shingalis?

Shingalis waa finan yaryar oo maqaarka kasoo baxa oo uu keeno fayraska varicella zoster virus (oo ah fayraska keena hablobaasta). Kadib marka qofku ka bogsado hablobaasta, fayrasku jidhka ayuu sii joogaa. Sida badan fayrasku ma keeno wax dhibaatooyin ah; hase yeeshee, wuxuu firfircoonaan karaa sannaddo kadib, isaga oo keenaya shingalis. Taabashada tooska ah ee finanka shingalisku waxay ku keeni karaan hablobaas qof aan hore u qaadin hablobas ama aan si fiican loo tallaalin. Tallaalka shingaliska waxa heli kara dadka 60 ama kawayn.